

Analyz F. O. B Test

Falanqaynta shaybaarka F.O.B

Uruurinta shaybaarka F.O.B

SOMALISKA

1

Xaanshida musqusha ku soo qaad inyar oo saxaaro ah, ama ururinta saaxarada awgeed xaanshida musqusha saar fadhiga musqusha.

2

Fureha BULUUGGA ka saar tuubada shay-baarka, kaddib ka soo saar qoriga shay-baarka ee yar. Dhinaca hoos ee cad waa in aan la taaban (waxaa loogu talagalay oo keliya shaqaalaha rugta shay-baarka)

3







Dabada fureha shay-baarka ee BULUUGGA dhowr meelood ka dhegeli saxaaradda.

4

Qoriga shay-baarka ka tirtir wixii saxaarad oo dheeraad ah, adigoo hab xasilan isticmaala xaanshida musqusha. Waa in saxaaradda la mariyaa halka godan oo keliya.

5

Qoriga shay-baarka ku celi tuubada kaddib si fiican u xir.



* Dheecaanka tuubada waa in aan la cunin.

- Waxaa aad muhim u ah in shay-baarka aan layska qaadin iyadoo qofku u qabo caadada, baabasiir dhiigbax leh ama kaadidiisa dhiig leh.
- Tuubada ku calaamadeey magaca, tobanka lambar ee aqoonsiga [personnummer] iyo taariikhda shay-baarka. Markaas kaddib shay-baarka waxaa lagu keydin karaa heer-kuleelka qolka. Shay-baarka waa in hawlgal laga qabtaa 15 maalmood gudahooda, tiriskaas oo laga soo bilaabo maalinta shay-baarka layska qaaday.